

Qof kasta waa in laga tallaalo xiiq-dheerta.

Xiiq-Dheerta

Haddii aad qabtid hargab ama qufac ka sii daraya oo socda wax ka badan hal toddobaad:

- Guriga joog oo ha aadin dugsiga, ha qaban shaqo ama hawlo kale ilaa aad ka arkayso daryeel bixiye caafimaad.
- ska ilaali in aad taabato dhallaanka da'doodu ka yar tahay 1 sano iyo haweenka uurka leh.
- Wac daryeel caafimaad bixiyahaaga si aad u dhahdo in aad u malaynayso in ay tahay xiiq-dheer.



Waa maxay xiiq-dheertu?

Xiiq-dheertu iyo pertussis (xiiq-dheerta) waa magacyada isla hal cudur oo xanuun u keena sambabada iyo cunaha. Si sahlan ayuu u faafi karaa. Dadka intooda badan waa laga daaweyn karaa isla markaana way ka bogsoon karaan, laakiin dhallaanka ay da'doodu ka yar tahay 1 sano waxaa soo wajihi kara cudurka sambabada ku dhaca (pneumonia), qalal, dhaawac maskaxda soo gaara ama xataa dhimasho.

Waa maxay calaamaddaha iyo astaamaha lagu garto?

Xiiq-dheertu waxay u bilaabantaa sida hargabka caadiga ah oo kale iyadoo wadata sanko oo duuf ka socdo, hindhiso iyo qufac. Qufaca ayaa ka sii dara, isagoo sababa qufac dubaaxin leh isla markaana socda toddobaadyo ilaa bilo. Inta uu socdo qufaca dubaaxinta leh, dadka neeftaa ku dhagi karta, wey hiinraagi karaan ama waxay samayn karaan cabaad dheer. Waxaa ku adkaata in ay wax cunaan, cabaan ama neefshada. Aad bay u qufaci karaan ilaa ay ka matagaan.

LA SOCODKA XIIQ-DHEERTA EE MEELAHA MAGAALADA AH



Sidee bay xiiq-dheertu u faaftaa?

Xiiq-dheerta waxaa la faafiyaa marka qof qaba xanuunku uu hindhiso, qufaco, ama jeermiska uu soo gaaro afkooda ama sankooda.

Dadku waxay cudurka faafin karaan laga soo bilaabo calaamada u horraysa ee xanuunka ilaa marka ay daawooyinka antibiotics qaadanayeen shan maalmood.

Dhallinyarada iyo dadka waaweyn waxaa suuragal ah in ay soo gaarto jiro fudud, laakiin waxay xiiq-dheerka qaadsiiin karaan dhallaanka iyo carruurta yaryar. Waalidiinta iyo qoyska kale ee u dhow waxay qaadsiiin karaan ilmaha cusub ee dhasha.

Sidee baan uga hortagi karaa pertussis (xiiq-dheerta)?

- In aad sii wado qaadashada tallaalkaagu waa habka ugu fiican ee looga hortago xiiq-dheerta. Dhammaan carruurta waxay baahan yihiin shan tallaalkada DTaP oo taxane ah (Gawracatada, teetanada, pertussis ‘xiiq-dheerta’) da’aha u dhexeeya 2 bilood iyo carruurta barbaarinta ku jirta. Dhallinyarada iyo dadka waaweyni waxay u baahan yihiin xoojiyaha ‘booster’ Tdap (nooca dadka waaweyn loogu talagalay ee isla tallaalka isku midka ah). Haweenka uurka leh waa in ay helaan xoojiyaha ‘booster’ uur kasta oo ay yeeshaan.
- Dhallaanka ka fogee qof kasta oo qaba qufac.
- Dabool qufacaaga isla markaana dhaq gacmahaaga.

Tallaalka xiiq-dheertu ma yahay mid badbaado leh?

Tallaalku waa mid badbaado ah. Dadka la tallaalay wali way qaadi karaan xiiq-dheerta, laakiin tallaalku waa habka ugu fiican ee looga hortago cudurka. Tallaalku wuxuu keeni karaa xanuun ku meel gaar ah ama xumad, laakiin in jiro laga qaado xiiq-dheerta ayaa aad uga daran.

SIDEE BAA XIIQ-DHEERTA LOO DAAWEYAA?

Daawooyinka antibiotics ayaa loo isticmaalaa in lagu daaweeyo xiiq-dheerta. Kaniiniyada waxaa suuragal ah in aanay isla markiiba dadku ku ladnaan, laakiin waxay ka dhigaysaa in aanu faafin cudurku.

Qof kasta oo qaba xiiq-dheerta waxaa laga codsan doonaa in uu guriga joogo oo aanu dugsiga aadin muddo shan maalmood ah. Taasi waa inta ay qaadatao kaniinigu in uu shaqeeyo isla markaana kaga hortago in aanu cudurku faafin.

CIDA AY TAHAY IN LA WACO

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xiiq-dheerta ama tallaalka, wac daryeel caafimaad bixiyahaaga ama barnaamijka La Socodka Xiiq-Dheerta ee Meelaha Magaalada ah (MAPS):
503-313-6982

